



Imtixaanka la dejiyay ee dugsiyada: Macluumaadka Qoyska

Imtixaanka la dejiyay ee dugsiyadu waa mawduuc inta badan dadku ka hadlaan. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay jeclaan lahaayaan in qoyskaagu si buuxda uga war qabaan waxyaalaha imtixaanaadka la dejiyay ugu fadhiyaan ardaygaaga iyo dugsiyagaaga.

Qaab muhiima oo wax loo barto

Qiimaynta gobolka Oregon (imtixaanaadka gobolka) waxaa mara ardayda fasalada 3-8 iyo 11 si loo qiimeeyo Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska, xisaabta iyo sayniska.

Laga bilaabo xilligan gu'ga ah, imtixaannada cusub – oo loo yaqaan Qiimaynta Isku dheeli tirka Wanaagsan “Smarter Balanced Assessments” – ayaa beddeli doonta qiimayntii mudada badan soo jirtay ee Qiimaynta Aqoonta iyo Xirfaddaha Oregon ee imtixaanaadka xisaabta iyo Xirfaddaha Luqadda Ingiriiska. Imtixaanaadka cusubi wuxuu qiimeeyaa waxyaalaha ardaydu ay baranayaan ee hoos yimaada Heerarka La raaco ee Gobolku Dejiyay “Common Core State Standards” ee cusub. Imtixaanaadka cusub ee sayniska ayaa soo raaci doona marka PPS ay si buuxda u dhaqan galiso Heerarka La raaco ee Gobolku Dejiyay “Common Core State Standards” ee sayniska.

Dheeli tirka Wanaagsan ee imtixaanaadku:

- **Wuxuu tilmaamaa sida wanaagsan ee ardaydu ay u barten xirfaddaha aqooneed iyo dabeecadaha maskaxeed** ee lagu dejiyay Heerarka La raaco ee Gobolku Dejiyay “Common Core State Standards” kuwaasi oo loogu tala galay in ay ardaydu diyaar u noqdaan jaamacadda iyo shaqooyinka. Macluumaadkani wuxuu ardayda, macalimiinta iyo dugsiyada ka caawiyaa in ay isku mid ka dhigaan tilmaamaha la raacayo si ay u xaqiijiyaan in dhamaan ardaydu ay baranayaan wixii ay ahayd in ay bartaan.
- **Wuxuu qiyaasaa sida wanaagsan ee dugsiyadu ugu adeegayaan ardayda.** Gobolku wuxuu kaydiyaa natiijooyinka imtixaanaadka ee arday kasta sidoo kale guud ahaan dugsi kasta. Gobolku wuxuu sidoo kale la socdaa inta arday ee gashay imtixaanaadka, iyadoo u baahan in 95 boqolkiiba ardayda dugsiyadu galaan imtixaanaadka fasalada kala duwan ee imtixaanaadkooda la gali karo. Gobolku wuxuu hoos u dhigaa darajada dugsiyada aan arday ku filnayni galin imtixaanaadka. Inta badan qoysasku waxay natiijada imtixaanka dugsiyada iyo darajooyinka uu leeyahay u isticmaalaan marka ay dooranayaan halka ay u diri lahaayeen carruurtooda, iyadoo dugsiyada degmada iyo gobolkuna ay macluumaadka u isticmaalaan in ay go'aan kaga gaaraan dugsiyada u baahan in fiiro gaar ah la siiyo ama maalgalin si kor loogu qaado guul gaarida.
- **Waa ka qayb-galin dheeraad ah, macluumaad la is dhaafsanayo iyo “xaalad dhab ah” oo ka duwan imtixaanaadkii hore** oo waalidiinta iyo ardayda ka caawiya in ay gartaan dhinacyada waxbarasho, xirfaddeed ama dabeecadaha maskaxeed ee ardaydu ugu baahan yihiin in ay tababar dheeraad ah helaan.

Waxyaalaha looga baahan yahay qalin jabinta

- Oregon, ardayda waxaa looga baahan yahay in ay muujiyaan in ay heer sare ka gaareen qaybo muhiim ah si ay uga qalin jabiyaan dugsiyada sare.
- Galida imtixaanaadka ee marka lagu jiro heerarka waxbarasho ee fasalada hore waxay ardayda u diyaarisaa in si lagu guulaystay u muujiyaan sida ay heer sare uga gaareen iyo in ay buuxiyaan waxyaalaha qalin jabinta looga baahan yahay ee dugsiyada sare.
- Ardayda waxaa looga baahan yahay in galaan imtixaanaadka gobolka iyadoo taasi laga dhaafo maahane.

Iska reebida

Sharciga gobolku wuxuu ardayda u ogol yahay in ayna laba sababood imtixaanaadka uga qayb galin: naafanimo ama sababo dhanka diinta ah. Ogolaanshaha waalidka ayaa ardayda looga baahan yahay si aanu uga ka qayb galin imtixaan.

Waxyaalo dheeraad ah ogow

Waxyaalo dheeraad ah ka ogow imtixaanka, sida ka reebida ardayga, booqo www.ode.state.or.us/home/ ama la hadal maamulaha dugsiyagaaga. Waxyaalo dheeraad ah ka ogow Qiimaynta Isku dheeli tirka Wanaagsan “Smarter Balanced Assessments” booqo www.pps.net, raadi halka ay ku qoran tahay “Common Core,” ama booqo www.smarterbalanced.org.

Haddii aad hayso su'aalo dheeraad ah, la xiriiir Joe Suggs, Maamulaha PPS ee Cilmi-baarista, Eegida Tayada & Qiimaynta, jsuggs@pps.net ama 503-916-3341. Isbaanish, 503-916-3582. Vietnamese, 503-916-3584. Af-Ruushka, 503-916-3583. Shiinaha, 503-916-3585. Af-Soomaali, 503-916-3586.